



# Macluumaad Dheeraad ah oo Ku Saabsan Tallaalka COVID-19 ee Ardayda Da'doodu tahay 16+

Maayo 4, 2021

Qoysaska iyo Ardayda Dugsiga Sarre ee Qaaliga ah,

Ardayda da'doodu tahay 16 jir iyo ka weyn ee Dugsiyada Degmada Portland, oo ay ka mid yihiin Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), waxaa la siinayaa fursado cusub oo **tallaalada COVID-19 oo lacag la'aan ah, laga bilaabo todobaadkan iyada oo goobta laga qaadanayo tahay Oregon Convention Center**. Haddii ardaygaaga da'diisu tahay 16 sanno iyo ka weyn kaasi oo aan wali la tallaalin, waxaan idiin rajeyneynaa inaad fursadani ka faa'iideysataan.

Ardayda waxaa la siin doonaa tallaalka Pfizer; kaasi oo la kala qaadanayo labo jeer oo xiga, halkii tallaal ee la siiyaba waxaa u dhaxeeyn doonta saddex todobaad. Tallaalka ugu horeeya waxaa la qaadanayaa taariikhaha foomka ee hoos ku xusan.

**FADLAN WAXAAD OGAATAAN:** Fursadani waxaa **sidoo kale ka faa'iideysan kara xubnaha qoyska ardayda intooda kale** ee dugsiga sarre. Si fudud ugu buuxi foomka xubin kasta oo qoyska ka mid ah sidii ay ballanta tallaalka u qabsan lahayd.

Fadlan u [buuxi foomkani](#) ardaygaaga ballanta qabsanaya sidii uu tallaalka u soo qaadan lahaa. Haddii aad u baahan tahay baabuurkii ku keeni lahaa ama kaa soo celin lahaa goobta tallaalka lagu bixinayo ee Oregon Convention Center, fadlan waxaad ku caddeysaa foomka si uu kuula soo xiriiro qofkii kuu qaban booskii aad basaskayga ku keenaya goobta ka raaci lahayd.

Foomka waxaa la socda faahfaahin iyo macluumaad dheeraad ah, sidaas awgeed fadlan guji si aad wax badan uga ogaato fariinta foomku xambaarsan yahay.

Waxaan ka warqabnaa in nidaamka tallaalku yahay mid u muuqda in marka la buuxinayo lagu wareero, haddana waxaan idiin rajeyneynaa in nidaamkan aan idin siineynaa yahay ka ugu sahlan oo aad si toos adiga iyo ardaygaaga dugsiga sarre u heli kartaan. Waxaan halkan u joognaa sidii aad idiin caawin lahayn, iyada oo aan rajeyneyno inaad fursadani ka faa'iideysan doontaan.

Mahadsanid.